

MINNESOTA

Project ADAM[®]

SAVES LIVES

Waxaa soo bandhigaya



Agaasimaha Caafimaadka

Andrew Schneider, MD

Iskuduwaha


Terasa Smith, RCIS, BHA

Iskuduwaha

Nathan Neis, RN, DNP, PNP

Iskuduwaha

Becky Neis, RN, BSN, CCRN



Project ADAM waa ururweyne ka jira dalka oo dhan oo iskuullada ku caawiya sida la isugu diyaariyo oo looga jawaabo markay iskuulka gudihiisa ka dhacdo wadne-istaagid lama filaan ah. Project ADAM waxaa lagu aasaasay Wisconsin 1999 mar ay ka dhacday geeri naxdin leh oo ahayd ciyaartoy ku jiray dugsiga sare. Barnaamijkan waxa uu xarumo ku leeyahay 29 gobol oo kuwa kale ayaa ku soo biiraya. Project ADAM Minnesota waxaa la aasaasay 2021 oo waxaa iska kaashaday Kilinigga Wadnaha ee Children's iyo Children's Minnesota Hospitals and Clinics.

Tirakoobyada dalkan waxa ay muujinayaan in ay in ka badan 350,000 oo ah dad qaangaaray iyo carruur oo ku nool Mareykanka in ay u dhintaan wadne-istaagid lama filaan ah sannad kasta. Badanaa in uu dadka wadnaha istaago waxay ka dhacdaa meelo ka baxsan isbitaalka. In laga soo kabsado wadnaha qof ku istaaga meelo ka baxsan isbitaalka waa fursad ka yar 10%. Degdeg in loo garto iyo qorshe ah waxqabad degdeg ah ayaa lagu heli karaa natiijo fiican.

Yoolka Project ADAM waa in laga hortago dhimashada degdegga ah ee wadnaha ka dib markuu wadnuhu istaago iyadoo dadka la siinayo macluumaad, qorshe, iyo tababar ah mid kooxeed. Project ADAM MN wuxuu bixiyaa talabixin bilaash ah oo loogu yimaado iyo qiimeynta goobaha si la isugu diyaariyo xaaladaha degdegga ah. Yoolka kama-dambeysta ah waa in ay iskuulladu ka qeybqaataan si ay uga guulgaaraan in ay noqdaan Heart Safe School (Iskuul Caawin Kara Wadne-istagidda), taas oo ah in ay haystaan qorshe degdeg ah oo u diyaarsan oo ay u soo barten xaaladaha degdegga ah iyo qalab lagama maarmaan ah oo looga jawaabo haddii ay xaalad degdeg ah dhacdo.

Project ADAM MN wuxuu dadka ku caawinayaa in ay bartaan habka Heart Safe School (Iskuul Caawin Kara Wadne-istagidda) iyadoo sameynaya:

- In ay si degdeg ah u aqoonsadaan arrimaha khatarta ah, astaamaha, iyo calaamadaha wadnaha u istaaga sida kediska ah
- Bixinta buug dhammeystiran oo ay weheliso tilmaamo ah tallaabo-tallaabo oo ku saabsan sida loo diyaariyo iyo sida loo hirgeliyo qorshe waxqabad degdeg ah oo looga jawaabayo markuu qof wadnaha istaago
- In ay iskuulka gudihiisa ku diyaarsadaan koox u xilsaaran jawaabta degdegga ah oo si habeysan uga jawaabi karta marka uu qof wadnahiisu istaago
- In lagu tababaro qalab loo keenayo oo u eg xaaladaha la arki karo ee sookicinta wadnaha istaaga
- In lagu caawiyo garashada marka baahi loo qabi karo qalabka kicinta wadnaha ee toos ah iyo meelaha qalabkaas la dhigayo ee dhismaha gudihiisa
- In la baro sida loo dayactirka qalabka, aqoonkororsi joogto ah, iyo sida tijaabooyin loo sameeyo
- In ay xiriir la yeeshaan kooxdaa gurmada koowaad ee magaalada si ay isaga caawiyaan dedaalka si kor loogu qaado fursadda sookicinta wadnaha

Marka ay gaaraan aqoonsi ah habka Heart Safe School (Iskuul Caawin Kara Wadne-istagidda), goobahoodu waxay heli doonaan caddeyn ay ka heleyaan Project ADAM si ay ugu muujiyaan xaruntooda iyo si ay ugu farxaan guulgaaristooda!

Wixii macluumaad dheeraad ah, ama haddii aad dooneyso in aad ka mid noqoto Project ADAM Minnesota, fadlan nagala soo xiriir projectadam@childrensMN.org & terasa.smith@childrensmn.org.